



Folkhälsomyndigheten

## Talooyin loogu talagalay qofka adigoo kale ah oo socdaal ku yimaada Dalka Iswiidan kana soo gala dalalka dibadda ku yaalaan

Halista in noocyo cusub oo ah cudurka [Covid-19] dalka soo gaaraan weli aad ayay u wayn tahay. Sidaa awgeed, waxay Hay'adda arrimaha caafimaadka dadwaynaha [Folkhälsomyndigheten] talooyin u soo jeedinaysaa dadka socdaal ku yimaada Dalka Iswiidan kana yimaada dalal ku yaallo dibadda dalalka Isbahaysiga Yurub, Is-bahaysiga dalalka Midowga Yurub, Norway, Iceland iyo Liechtenstein [EES], Goobaha loo yaqaanno [Schengenområdet] iyo dalka Ingriisiga, iyo dhawr dalal kale. Dowladda waxay kaloo go'aan ku gaartay in muwaadiniinta dalka Iswiidan iyo socdaalladayaasha dalka soo gala, kana yimaada dalalka Norway, Finland, Danmark iyo Iceland aynan u baahnayn in ay haystaan caddaynta natiijada shaybaarka ee lagu xaqiijiyay in qofku usan cudurka [Covid-19] ku dhicin sida ay dalka ku soo galaan awgeed.

## Shuruudaha haysashada caddaynta natiijada shaybaarka ee lagu xaqiijiyay in qofku usan cudurka [Covid-19] ku dhicin ee Dalka Iswiidan lagu soo galo

Dadka socdaal ku yimaada Dalka Iswiidan kana yimaada dalalka ku yaalaan dibadda dalalka Waqooyiga Yurub ku yaalaan, sidii Dalka Iswiidan ay ku soo galaan awgeed waa in haystaan caddaynta natiijada shaybaarka ee lagu xaqiijiyay in qofku usan cudurka [Covid-19] ku dhicin.

Muwaadiniinta dalka Iswiidan ama socdaalladayaasha ka yimaada dalalka Norway, Finland, Danmark iyo Iceland uma baahna ay haystaan caddaynta natiijada shaybaarka ee lagu xaqiijiyay in qofku usan cudurka [Covid-19] ku dhicin sida ay dalka ku soo galaan awgeed. Isla nidaamkaas ayaa khuseeyo xitaa dadka aan weli 18 sano buuxsan, iyo dadka sharciga degaanshada dalka Iswiidan ka haysto, iyadoo aan fiirogaar la siin jinsiyadiisa.

## Talooyinka xiriirka la leh go'doomin iyo shaybaar ka qaadis soo gelista Dalka Iswiidan kaddib

Wasaaradda arrimaha dibadda waxay talo ahaan soo jeedinaysaa in socdaal dalalka qaarkood aan lagu tegin waa haddii lagamamaarmaan ay noqon karto.

Socdaaleyaasha oo toddoba maalmood kahor booqday dalal kale, kahor in aynan iman Dalka Iswiidan, waxaa lagula talinayaa in ay iska baaraan cudurka [Covid-19] kaddib markii Dalka Iswiidan ay yimaadaan, iyo markii shan maalmood ay ka soo wareegato tan iyo markii Dalka Iswiidan ay yimaadaan. Socdaaleyaasha waxaa toddobada maalmood ee ku xigta kaddib markii Dalka Iswiidan ay yimaadaan kaloo lagula talinayaa in ay is go doomiyaan iskana ilaaliyaan yeelashada xiriiryada dhow. Taasoo macneheedu tahay in adiga:

- Iska qaado shaybaarka cudurka [Covid-19] sida ugu dhaqsida badan kaddib markii Dalka Iswiidan aad soo guda gasho, ka sii fiican isla maalintaas. Booqo barta internet [1177.se](http://1177.se) kaddib ka baadigoob halka shaybaarka aad isaga qaadi karto. Haddii 48 saacado kahor imaanshaha dalka Iswiidan laga qaaday shaybaar, xaaladdaas uma baahnid inaad shaybaar cusub iska qaado markii aad dalka timaado.
- Shaybaar cusub iska qaad shan maalmood kaddib markii Dalka Iswiidan aad soo gasho. Tusaale: Haddii Dalka Iswiidan aad soo guda gasho maalin jimce ah waa inaad shaybaar cusub iska qaado maalinta arbacada.
- Toddobada maalmood ee ku xigta kaddib markii Dalka Iswiidan ay aad timaado waxaa lagula talinayaa inaad is go'doomiso oona iskana ilaaliyaan yeelashada xiriiryada dhow. Waa inaad sidaas u dhaqanto xitaa haddii shaybaarrada lagu xaqiijiyo in usan cudurka [Covid-19] kugu dhicin. Haddii shaybaarrada lagu xaqiijiyo in uu cudurka [Covid-19] kugu dhacay, waxaa lagu siin doonaa talo gaar ah oo xiriir la leh wixii aad sameeyn lahayd xarumaha daryeelka bukaha iyo caafimaadka.

## Talo-siinta ma khuseeyso

- Dadka booqday dalalka magacyadooda aan ku xusnayn liiska Wasaaradda arrimaha dibadda, kaasoo xiriir la leh in aan socdaal lagu tegin haddii socdaalka lagamaarmi karo. [Liiska magacyada dalalkaas waxaa ka aqrisan kartaa barta internetka ee Wasaaradda arrimaha dibadda.](#)
  - Dadka hab aan qabyo ahayn loo tallaalay (la tallaalay laba jeer, kana soo wareegatay laba toddobaad tan iyo markii tallaalka labaad lagu tallaalay), oona maaddooyinka ay ahaayeen kuwa Hay'adda EMA ay ansixisay (eeg [EMA](#)) ama ay ahaayeen maaddooyin Hay'adda caafimaadka adduunka ee QM WHO ansixisay isticmaalkooda (eeg [WHO:s EUL](#)) talo-siinta gebi ahaan ma khuseeyso.
  - Sidoo kale ilmaha aan weli lex sano buuxsan talo-siinta ma khuseeyso. Haddii ilmaha aynan khusayn ka reebid kale, waxaa lagula talinayaa in guryahooda iska joogaan oona laga ilaaliyo in xiriir dhow ay yeeshaan kaddib markii dalka ay yimaadaan.
  - Dadka soo galka Dalka Iswiidan dartiisa lagu shuruudeeyo in ay haystaan caddaynta natiijada shaybaarka ee waxkamajiraanka ah [Negativt], ma
-

khuseeyso talo-siinta in shaybaar iska qaadan kaddib markii dalka ay soo galaan. Haddii qofka aynan khusayn ka reebid kale, waxaa lagula talinayaa in muddo toddoba maalmood u is go`doomiyo kaddib shan maalmood dalka soo gelista kaddib shaybaar iska qaado.

- Haddii sabab darteeda aynan ku suurtagalayn inaad shaybaar cudurka [Covid-19] iska qaado, xaaladdaas waa arrin aad muhim u ah inaad is go`doomiso, iskana ilaaliso yeelashada xiriiryada dhow ugu yaraan toddoba maalmood kaddib markii Dalka Iswiidan aad imaado.

## Is-go`doomi kaddib sug jawaabta natiijada shaybaarka

Haddii ay ku khuseeyaan talooyinka xiriirka la leh shaybaar ka qaadis iyo go`doomis kaddib markii Dalka Iswiidan aad timaado, waa inaad ugu yaraan toddoba maalmood guriga iska joogto oona iska ilaaliso yeelashada xiriiryada dhow. Haddii calaamadaha cudurka [Covid-19] aadan dareemin ama lagu siiyo natiijada shaybaarka ee waxkamajiraanka ah [Negativt] xaaladdaas toddoba maalmood kaddib dibadda ayaa u bixi kartaa. Laakiin waa inaad mar kasta tixgeliso [dardaaranada iyo talooyinka guud](#) kuwaasoo qof kasta u khuseeyo.

## Haddii calaamadaha cudurka aad dareento

Toddobada maalmood ee ku xiga kaddib markii Dalka Iswiidan aad timaado waa inaad fiirogaar siisaa calaamadaha cudurka [Covid-19]. Haddii calaamadaha aad dareento waa in sida ugu dhaqsida badan iska qaado shaybaar, ka aqriso barta internet [1177.se](#) sida shaybaar laysaga qaado gobolka aad ku sugan tahay.